# Dugsi Sare iyo Qalinjabin

Hagaha Qoyska Cusub

**Barnaamijka Dugsi sare Nova Scotia waxuu bixiyaa koorsooyin baaxad leh oo ka caawinayo ardayda nolasha dugsi sare kadib.**

Dugsi sare ku yaal Nova Scotia

- waxaa ku jiro koorsooyinka fasallada 10, 11, iyo 12
- waxa uu leeyahay labo teeram - teeramka kowaad waa Sebtember ilaa Janaayo, iyo teeramka labaad waa Febraayo ilaa Juun
- waxaa maalgaliso-dowlada markaa ma jiro wax qarash toos ah oo ka qeyb qaadashada
- waxa uu u furan yahay ardayda ilaa ay ka garaan da'da 21 sanno

Koorsoyinka ay heli karaan dugsi sare waxa ay ku taxan yihiin bogga internetka ee Manhajka Nova Scotia. Iskuulada qaar ayaa laga yaaba in ay bixiyaan koorsooyin dheraad ah.

## Nolasha dugsi sare

**Sida fasallada leyskugu duwo:** Ardayda ayaa inta badan qaata afar xisadood laga soo bilaabo Sebtembar ilaa Janaayo, kadibna afar xiisadood kale laga soo bilaabo Febraayo ilaa Juun.

- Arday walbo waxaa la siiya jadwal shaqsiyadeed oo fasallada bilaawga sanad dugsiyeed ama teeram walbo.
- Iskuulada ayaa u kala qeybiyo maalinta waqtiyo go'an oo loo yaqaano xiisado. Iskuulo badan, ardayda ayaa iskaga kala gooshto fasal ka fasal maalinti oo dhan sida xiisadahoodu isku badalayaan. Ayada oo ay ku xiran tahay culeyska koorsooyinka ardayga, waxaa suurta gal ah in ay leeyihiin xiisad fasaxa oo aan cashar laheyn.

**Soo xaadirida:** Si aad u shaqeysato dhibcaha koorso dugsi sare, ardayga waxaa laga filaya in uu joogo ugu yaraan 80% waqtiga fasallada dhamaan. Eeg *Siyaasada Latacamulka iyo Imaanshaha Ardayga* waxii warbixin dheraad ah.

**Bogga Waalidka- Ardayga:** Xogta ardayda waxaa lagu maareya nidaam elektaronig ah loona yaqaan PowerSchool, waxaa ku jira bogga Waalidka-Ardayga ee lag heli karo xogta sida jadwalkiisa, leyliyada, gareedka, imaanshaha, faalloyinka macalinka, iyo ogeysiisyada kala ee iskuulka.

- Ardayga iyo waalidka/masuuliyiinta ayaa heli kara boggan.
- Shaqaallaha xafiiska waalidka ayaa ku siin kara ciwaankaga iyo nambar sireedkaga.
- Si aad u isticmaasho bogga, booqo: www.ednet.ns.ca/inschool/students_parents.

## Qorsheynta mustaqbalka

Marka ardaydu bilaawdo dugsi sare, waxaa looso bandhigaa koorsooyin faro badan oo ay kala doortan. Koorsooyinka ardaydu doorato waxa ay saameyn karaan fursadaha shaqadiisa mustaqbal ee dugsi sare kadib.

Ardayda iyo waalidiinta/masuuliyiinta waxaa lagu dhiiro galinaya in ay

- iskala hadlaan danaha ardayga, awoodiisa, iyo waxuu heysto
- kala haldlaan latalliyaha iskuulka fursadaha koorsooyinka iyo nolasha ka danbeyso dugsi sare
- waxaad baarta fursadaha koorsoyinka ee waafaqsan hiigsigaaga iyo/ama dugsi sare kadib
- kasoo qeyb gal bandhigyada iskuulka iyo kulamada warbixinta ee ku saabsan doorashada koorso
- dib u eeg qorshooyinka si joogto ah misna u badal sidaa u baahan tahay

**Latalliyayaasha iskuulka:** Latalliyayaasha iskuulka ayaa xirfad u leh bixinta fursado ballaaran oo wada shaqeyn, isla goobta, adeegyada ardayda, qoysaska iyo iskuulada. Adeegyadooda waxaa kamida habab ka hortag iyo ka falcelin taagerid ardayga ee caafimaadka maskaxda, daryeelka, iyo horumarka, waxbarashada ardayga iyo guullaha, iyo isbadalka nolasha iyo qorsheynta mustaqbalka shaqo.

**NashqadeydaAassaas (MyBlueprint):** Nashqadeyda Aassaas waa midla saaxiba ardayga, waxbarashada iyo agabka qorsheynta mustaqbalka shaqo/nolal taas oo u ogolaaneyso ardayda in ay qimeyaan warbixinta suuqa shaqo, awoododa, danahooda, iyo waxbarashadooda mustaqbal iyo wadooyinka shaqooyinka mustaqbal. Ardayda ayaa soo gali karo si ay u egaan waxbarashadooda, u muujiyaan kobacooda, misna kusoo bandhigaan guulahooda. Xubnaha qoyska ayaa sidoo kale sameysan karo ciwaanka MyBlueprint si ay uuga caawiyaan ardayga waxbarashadiisa iyo qorsheynta mustaqbalkiisa shaqo. Si aad u isticmaasho, ardayga ayaa kuuso diri karo linki codsi oo xubnaha qoyska ah.

**Isku-xirayaasha Dugsiyada ee Shaqooyinka Nova Scotia** Isku-xirayaasha Dugsiyada ee Shaqooyinka Nova Scotia ayaa lagu qoraa iskuulada gobolka si ay u siyaan xogta suuqa shaqada, u helaan fursadaha ardayda, siminaarada ardayda iyo qoysaska ee ku saabsan qorsheynta shaqoyinka mustaqbal, iyo wax ka badan.

**Booqo:** Isku-xirayaasha Dugsiyada ee Shaqooyinka Nova Scotia (NSWSLs) & Aan Kahadalno Mustaqbalka-Shaqo si aad u hesho NSWSL
ka kugu dhaw.

## Fursadaha koorso ee qalinjabinta

Shahaadada Qalanjabinta Dugsi Sare ayaa lagu abaalmariya ardayda si buuxda u dhameya ugu yaraan 18 dhibco koorso ee dugsi sare. Si buuxda u dhameynta koorso micnaheedu waa in ardaygu helay 50% ama wax ka sareeyo ee koorsada. Koorso walbo sida caadiga waxa ay u dhigantaa 1 dhibic/credit.

- **18 dhibcaha koorso ee loo baahan yahay si aad u qalanjabiso waa in uu ku jiraa:**
  - wax aan ka badneyn 7 dhibcood ee heerka fasalka 10 aad

  iyo

  - ugu yaraan 5 dhibcood ee fasalka 12 aad
- **13 (kamida dhibcaha 18) ayaa lagu dhameyn doona qeybahan soo socda:**
  - 3 dhibcaha luuqada farshaxanka (1 xabo heer fasal walbo)
  - 3 dhibcaha xisaabta (1 xabo heer fasal walbo)
  - 3 dhibcaha seyniska iyo tiknoolajiyada
  - 3 dhibcaha kobaca shaqsi iyo bulsho
  - 1 dhibac farshaxanka
- **5-ta soo hartay (ee 18ka dhibac) wax ay ka imaan donaan koorsoyinka doorashada:**
  - Koorsooyin kala duwan ayaa laga bixiyaa iskuulada Nova Scotia.
  - Ardayda ayaa ka qeyb qaato barnaamijyada bulshada, ama waxqabadyada dheeriga ah, waxaa suurta gal ah in uu ku helo dhibic haddii uu ansaxiyo adeeg bixiye.

    Sannad dugsiyeed walbo, Waaxda Waxbarashada iyo Kobaca Caruurta Yaryar ayaa soo daabacdo "Liiska Koorsada iyo Adeeg Bixiyayasha la Ansaxiye"
  - Ardayda ayaa dhameyn karo koorsoyin dheeriya (waxii ka danbeyo 18 dhibacoodka loo baahan yahay si loo qalinjabiyo) si uu u waafajiyo danahiisa iyo hiigsigiisa.

### Waxbarashada Kahor

Haddii ay suurto gal tahay, waxaad bixisaa xogta waxbarashadii hore, warqadihi natiijoyinka ama riboot kaarada si uu iskuulku u xaqiijin karo inta dhibco dugsi sare laguugu siin karo waxbarashadii hore. Waxa suurta gal ah in ay faa'ido tahay in aad heysato dukumiintiyadan oo uu u turjumay Ingiriisi ama Faransiis turjumaan shati heysto.

**Si loo hubsado in ay kasoo baxaan shuruudaha qalinjabinta, ardayda waxaa lagu dhiiro galiya in ay lasoo xiriiraan latalliyayaasha iskuulka si ay iskula qimeyaan koorsoyinka lakala dooranayo.**

**Booqo bogga Internetka iskuulka waxii warbixin dheraad ah ee ku saabsan doorashada koorsada.**

# Barnaamijyada iyo koorsooyinka dugsi sare

Intaaad ka shaqeyneyso shahaadada qalijabinta dugsi sare, ardayda ayaa sidoo kale dhameyn karo barnaamijyada koorsooyinkan ama shahaadoyinka, loogu tallo galay in ay diirada saaran danaha iyo rabtitaanada shaqooyinka mustaqbalka oo qaas ah. Ardaydu waa in ay ka hubiyaan iskuulkooda si ay u xaqiijiyaan midkee koorsooyinkan ama barnaamijyada soo socda ayaa lagu heli karaa.

## Waxbarashada Wada-shaqeynta

Waxbarashada Wada-shaqeynta waa koorso akademik ah halkaas oo ay ardaydu ku baran donaan xirfado misna ku fahmi donaan wadooyinka shaqo mustaqbalka. Ardayda waxaa lagu qoraa goob shaqo halkaas oo ay ka korarsan karaan qibrada shaqo loo baahan yahay, ay ku baran karaan in ay fahmaan shaqada, ku kororsan karaan aqoonta aduunka runtaa, xirfadaha, iyo dabeecada ay u baahan yihiin si ay guul uuga garaan mustaqbalka shaqo. Ardaydu waa in ay ahadaan 16 sanno jir; ama haddii uu 15 sanno jir yahay ugu yaraan waa in ay fasalkooda soo bilaabeyn markuu 11 sanno jir ahaa. Ardaygu waa in uu u soo gudbiyaa codsi macalinkiisa wada-shaqeynta ee iskuulkiisa si uu iskaga diwaan geliyo koorsada.

## Xirfadaha Sare Shahaadada Weyn (High Skills Major Certificate)

Xirfadaha Sare Shahaadada Weyn waxa ay u ogolaaneysa ardayda in ay shaqeystaan dhibcaha shahaadada dugsi sare ayagoo dhameynaya koorsooyinka iyo qibrada aduunka runta ah ee la xiriirta shaqoyinka mustaqbalka ay daneynayaan. Ayada oo ay ku xiran tahay barnaamijka iskuulkoda laga bixinayo, ardaydu waxa ay shaqeysan karaan mid kamida shan shahaado: Farshaxanka, Hal-abuurka Dijitalka iyo Tiknolajiyada, Waxbarashada Caruurta Yaryar, Caafimaadka iyo Daryeelka, iyo Xirfadaha Ganacsi.

## Dooqyada iyo Fursadaha ($O_2$)

Dooqyada iyo Fursadaha ($O_2$) waa barnaamij saddax sanno ah oo siinaya ardayda qibrado kala duwan oo bulshada iyo goobaha shaqadda ah. Barnaamijka waxaa kamida safaro boogta shaqada, marti qudbad soo jeediso, tabobar adeega, mushruucyo bulshada kusaleysan, barashada farsamo, iyo dhibcooyin badan oo waxbarashada Wada-shaqeynta. Natiijadaas awgeed, ardayda ayaa awoodi doonto in ay iskuulka ku dabaqaan wadada shaqooyinka-mustaqbalka misna ay qataan go'aamo lahubo oo ku saabsan waxa ay rabaan in ay sameyaan dugsi sare kadib, oo ay ku jirto jaamacada, kuleejka, tobabarada, ama toos u aadida shaqo.

- **Ardayda ku jirta $O_2$ waa in ay ku codsadaan fasalka 9.** Waxaa jiro 20 kursi oo kaliya sannad walbo iskuulkii bixinaya barnaamijkan.

## Xirfadaha Ganacsi

Xirfadaha Ganacsi koorsada ayaa mataleyso goobta shaqada, agabka, qalanka, iyo waxqabadyada shaqada. Ardayda ayaa ku baran karo goob amaan ah misna ku haboon oo gacmaha loogula tagayo. Ardayda ayaa ku baranaya dabciga, xirfadaha, iyo aqoonta ay u baahan donaan shuruudaha ay ka rabi donaan, nolasha, shaqada, iyo barashada ganacsiga la xiriira shaqooyinka mustaqbalka. Ardayda ay waxbaraan farsamo-yaqaan shati heysta, ama uu ku kormeero goobta wadashaqeynta, ayaa u qalmi doona in ay shaqeystaan saacadaha shaqo ee shahaadadooda ganacsi.

### Barnaamijka Tababarka Shaqo-barashada ee Dhallinyarada

Nova Scotia, dhalinyarada ayaa isku diwaan gelin karo shaqo-barte haddii ay u dhaxeyaan 16 ilaa 19 sanno misna shifti ama waqti kaamila ka shaqeyo midkamida goobaha ganacsi ee Nova Scotia. Wax lacag diwaan gelin ah oo leyska rabo ma jiraan. Tababarka shaqo-bartaha dhalinta ah ayaa lacag lagu siiya barashada iyagoo ku horumaraya ganacsiga shaqadooda-mustaqbalka.

Tababarka shaqo-bartaha dhalinta ayaa siinaya ardayda fursad ay gacmaha ugula tagaan qibrada barashada ganacsiga iyagoo wali ku jira nidaamka iskuulka dowlada. Dhalinta ka shaqeyo goob xirfad ganacsi loo aqoonsan yahay ee uu kormeero farsamayaqaan shati heysto ayaa shaqeysan karo saacadaha looga baahan yahay ee shahaadada shaqo.

Waxii warbixin dheeri ah, booqo bogga internetka ee Tobabarka Shaqo-barashada ee Dhallinyarada.

### Barnaamijyada Luuqada Faransiiska

Ardayda dhigata iskuul Ingriiris ku baxo ayaa heli kara shahaadoyinkan soo socda marka ay dhameyaan koorsooyinka looga baahan yahay:

- Shahaadada Barashada Faransiiska Qoto-Dheer
- Shahaadada Barashada Faransiiska Isku-dhafka

### Qiimeynta Imtixaan Caalamiga (IB)

Shahaadada Qiimeynta Imtixaan Caalamiga (IB) waa barnaamij waxbarasho dheelitiran oo caalamka laga aqoonsan yahay laguna dhigo fasallada 11 iyo 12 oo 156 waddan aduunka oo dhan. Hadda waxaa jiro 13 IB Shahaado Diploma oo iskuulada Nova Scotia. Waxaaad la xiriirta latalliyayaasha iskuulka si aad u xaqiijiso haddii IB laga helo iskuulka.

Barnaamijka IB waxaa aqoonsan oo xushmeya jaamacadaha aduunka oo dhan ardayda ayaa ku heli karto dhibcaha jaamacada ee koorsooyinka IB.

## Waxbarashada Fogaanta Dheer (Waxbarashada Onleynka ah)

Ardayda fasalka 10 ilaa 12 oo u baahan ama rabaan in ay qataan koorso heerka dugsi sare ah ee aan lagu bixinin iskuulka deegaanka, ama aanan ku habooneyn jadwalkooda, waxa ay ku qadan karaan koorsada hab onleyn ah barnaamijka waxbarashada fogaanta-dheer.

- Barnaamijyada waxbarashada fogaanta dheer waa u bilaash ardayda dhigata iskuulada dowlada.
- Ardayda ayaa loola dhaqmaya sidii fasalada koorsooyinka caadiga ee ay arday yimadaan.
- Wadadan waxa ay sida ugu wanaagsan ugu shaqeysa ardayda ku fiican tiknolajiyada iyio waxbarashada onleynka awoodna u leh in ay iyaga iswadaan.

### Iskuulada Onleynka ee Nova Scotia (NSVS) / l'École virtuelle au CSAP (ÉVCSAP)

NSVS iyo ÉVCSAP koorsooyinka waxaa dhigo macalimiinta iskuulada dowlada Nova Scotia xiliyada iskuulka. Ardaydu waxaa laga yaaba in ay waqti heystaan waqtiga fasaladooda iyago uga shaqeyn karo koorsoyinka onleynka misna la kulmaya macalinkooda onleynka iyo ardayda ku fasalka onleynka ah ee iskuulka.

### Waxbarashada Onleynka Madaxabanan ee Nova Scotia (NSIOL)

Ardayda ku jirta koorsoyinka NSIOL waxbarashada madaxabanaan onleynka ah ee waqtigooda. Macalinka tobabaraha koorsada, heysta
leysin, ayaa ardayga onleyn kula kulmaya, fiidkii ama maalmaha fasaxa isbuuca, 8 ilaa 10 mar inta ay koorsada socoto. Macalinka tobabaraha ayaa ka caawinaya ardayga qorsheynta jadwalka casharadiisa isagoo hagaya guud ahaan koorsada laakiin uma dhigayo ama uma muraajaceynayo.

Ardayda waxa ay heystaa ilaa 18 bilood ay ku dhameyaan 1-kii dhibic koorsada, ilaa 24 bilood ay ku dhameyaan
2-dhibic koorso, iyo ilaa 6 bilood ay ku dhameyaan halkii cutub. Bogga internetka NSIOL waxaad ka heli kartaa warbixin dheraad ah, oo ay ku jirto koorsooyinka hadda iyo kuwa soo socda.

- NSVS iyo NSIOL koorsoyinka ayaa lagu heli karaa Ingiriisi iyo Faransiis guud ahaan Xarumaha Deegaan ee Waxbarashada (RCE).
- ÉVCSAP korsooyinka ayaa lagu heli karaa Faransiis ardayda dhigata iskuulada gobolka Conseil scolaire acadien (CSAP).

Waxii warbixin dheraad ah, booqo Waxbarashada Fogaanta Dheer ama kala hadal latalliyayaasha iskuulka haddii Waxbarashada Fogaanta Dheer ay adiga kugu haboon tahay. Ardayda ayaa onleyn iskaga diwaan gelin karto koorada waqtiga lagu jiro doorashada koorsada iskuulkooda.

## Imtixaanada Gobolka

Nova Scotia waxa ay goboladeeda bixiyaan imtixaanada koorsoyinkan soo socda:

- English 10
- Français 10 (CSAP)
- Xisaab 10
- Mathématiques 10

Imtixaanada Gobolka waxuu ka dhigan yahay 20% natiijada guud ee koorsada.

- Ardayda iska diwaan galiso koorsoyinkan waxa ay sameynayaan imtixaanada Gobolka ku haboon.
- Ardayda heysta **Barnaamijka Qorshaha Shaqsiga (IPP)** ee English 10, Français 10, ama Xisaab 10 ma sameynayaan imtixaanada Gobolka.
- Ardayda **shaqeysanaya Ingiriisi ama Faransiis oo luuqad dheraad ah** waxaa suurto gal ah in aan looga baahan
in ay sameyaan imtixaanadan. Maamulka, iyadoo lala tashanayo macalimiinta, waalidiinta/masuuliyiina
iyo ardayda, ayaa qeexi doono imtixaanke looga baahan doona in lasiiyo ardayga xirfadiisa luuqad ee hadda.
- Luuqadaha dheeriga ah ee ardayga ayaa loo ogolaan doona **turjumaan elektaronig ah iyo/ama qaamuus luuqadaha**. Waxaa sidoo kale la siin doona waqti dheraad ah, haddii loo baahdo.

Qeybta Qiimeynta Imtixaan ee Ardayga ee bogga internetka Waaxda Waxbarashada Kobaca Caruurta Yaryar ayaa leh warbixin dheraad ah ee ku saabsan Imtixaanada Nova Scotia.

# Macluumaadka xiriirka

Macluumaad dheeri ah, la xiriir Xarunta Gobolka ee Waxbarashada (RCE) ama Conseil scolaire acadien provincial (CSAP).

- **Annapolis Valley Xarunta Deeganka Waxbarashada** (AVRCE)
- **Cape Breton-Victoria Xarunta Deeganka Waxbarashada** (CBVRCE)
- **Chignecto-Central Xarunta Deeganka Waxbarashada** (CCRCE)
- **Conseil scolaire acadien provincial** (CSAP)
- **Halifax Xarunta Deeganka Waxbarashada** (HRCE)
- **South Shore Xarunta Deeganka Waxbarashada** (SSRCE)
- **Strait Xarunta Deeganka Waxbarashada** (SRCE)
- **Tri-County Xarunta Deeganka Waxbarashada** (TCRCE)
- **SchoolsPlus** waxay keentaa adeegyo iyo taageerooyin kala duwan, waxaana laga heli karaa dugsi kasta oo ku yaal Nova Scotia

Taageerada beeshaada, la xidhiidh:

- **YMCA Dejinta Iskuulka** – ayaa lag heli karaa guud ahaan-gobolka
- **YREACH** – laga heli karo dibada Halifax Dowlada Hoose ee Deegaanka (HRM)
- **Telefoonka Faransiiska ee socdaalka** – laga heli karo Shaqaalaha Dejinta Dugsiga